

Iska baaridda covid-19

Qalabkaada baaritaanka

Qalabka baaritaanka aad isku baareyso wuxuu ku baakadeysan yahay bac. Marka aad isbaarto waxaad isticmaali kartaa bacda si aad koobkaada iyo qoriga ugu riddo.

Waxyaabahan ayuu qalabka baaritaanku ka kooban yahay:


- Hal qori oo saamiga lagu qaado
- Hal tubbo saami iyo furkeeda
- Hal koob caag ah oo loo isticmaalo saamiga candhuufta
- Hal weel yar oo wata xal cusbo ah
- Warqad tilmaama oo wadata koor QR iyo mid diiwaan gelin
- Masar qoyan oo wata jeermis dilka gacmaha

Sidaan samee si aad u qaaddo saamiga una diiwaan geliso:

1. Aqri tilmaanta oo dhan intaadan bilaabin
2. Mobiilka ama webka ku diiwaan geli saamiga
3. Qaad saamiga
4. Soo celi saamiga

Ma dooneysaa inaad daawato filin tilmaameedku saabsan sida saamiga loo qaado? Iskaan-garee koodhka QR-koden!

Information in other languages?
Scan this QR code!



Tallaabo 1: Diiwaan geli saamiga

Si uu sheybaarku u ogaado cidda saamiga iska leh waa inaad taa la xiriirisaa tobankaada lambar. Waxaad taa ku sameyneysaa adigoo iskaan-gareeya koodhka QR ee ku yaal bogga danbe ee galkan, ama isticmaal koodhka diiwaan-gelinta ee ku yaal hoosta koodhka QR. Kadib ku soo bandhig aqoonsigaada qaabka aqoonsiga e-legitimation.

Sidaan samee:

1. Kaamarada mobiilkaada ama app aqriya QR ku iskaan-garee koodhka QR ee ku yaal bogga danbe ee faylkan.
2. Aqoonsigaada e-legitimation ku gal kadibna raac tilmaamaha

Ama:

1. Fur bog internetka ah, sida Chrome ama Safari, kadibna ku qor pep.1177.se/testkit meesha sare ee adareeska lagu qoro
2. Aqoonsigaada e-legitimation ku gal kadibna raac tilmaamaha
3. Diiwaan geli qalabkaada baaritaanka adigoo isticmaalaha koodhka diiwaan-gelinta ku hoos yaala koodhka QR ee bogga danbe ee faylkan.

Ku diiwaan geli baaritaanka carruurta qaabka wakiilka


Carruurta ka yar 13 sanno waxay u baahan yihiin inaad adiga waalidka ah u diiwaan geliso qaab wakiil koodhka diiwaan gelinta carruurta. FIIRA GAARA! Ma isticmaali kartid koodhka QR si aad u diiwaan geliso qalabka baaritaanka carruurta.

1. Warbixintaada ku gal 1177.se
2. Dooro ilmahaada (qaab wakiil) – hubi inay ku qoran tahay inaad tahay wakiil
3. Dooro Egen provhantering
4. Diiwaan geli qalabka baaritaanka ilmahaada adigoo isticmaalaya koodhka diiwaan gelinta ku yaal hoosta koodhka QR ee bogga danbe ee faylkan

Tallaabo 2: Qaad saamiga

Tallaabo 1: saami candhuuf ah

Koobka caaga ku tuf candhuuf 3-4 jeer oo salkiisa buuxi. Sug hal daqiiqo markasta aad candhuufta tufeyso. Kadib koobka dhinac iska dhig.




Tallaabo 2: Dalqada saami ka qaad

Usha saamiga lagu qaadayo ka soo saar xirmada saamiga. Gali dhabanka dhinaciisa oo dalqada gee. Usha ku xoq halka ugu danbeysa dalqada muddo 15 ilbiriqsi ah.



Tallaabo 3: Sanka saami ka qaad

Isla ushi soo qaado oo gali sanku. Ku xoq qiyaastii 2 cm gudaha sanku, 15 ilbiriqsi. Sidee kale samee duleelka kale ee sanku.




Tallaabo 4: Isku walaaq saamiga candhuufta

Gali usha candhuuftaada koobka caaga. Walaaq 15 ilbiriqsi.



Tallaabo 5: Isku qas tubadda saamiga kadibna xir

Soo qaad tubadda saamiga oo ku shub xalka cusbada wata. Kadibna afka usha gali tubadda saamiga. Rux 15 ilbiriqsi. Usha ka soo saar tubadda saamiga. Afka daboolka tubadda uga xir.



Tallaabo 3: Xir oo celi saamiga

Markaad saamiga qaaddo oo aad ka diiwaan geliso bogga 1177.se, waa inaad saamiga galisaa bacda afka la xiro kadibna aad xirtaa.

Usha iyo koobka caagga ku celi caaga bacda weyn uu qalabka baaritaanka ku yimid. Baca ku tuur meesha qashinka gurigaada.

Meyr ama aalkolo si fiican ugu nadiifi gacmaha markaad diyaar noqoto.

Kadi toos u aad xarunta baaritaanka lagu qaado oo gee saamigaada. Warbixinta saacadaha shaqada waxaad ka heleysaa meesha ballanta laguugu xaqiijiyey.

Haddii ay suura gal kuu tahay celi saamiga isla maalinta aad soo qaadatay, saamiga aad qaaday ku keydi qaboojiyaha ilaa maalinta xigta ee aad celinesyo.

Koodhka QR ee



Diiwaan gelinta